Somali | Soomaali

Bilaha Luulyo/Ogosto 2026

homes victoria

BIG HOUSING BUILD

# Flemington

Wixii ku soo kordhay Bulshada



## Munaasabadda winter warmer ee lagu qaban doono barxada cusub ee Murnalung

Kaalay oo nala baashaal waxyaabo xiiso leh oo qoyska ku habboon. Faahfaahinta munaasabadan waxaad ka aqrisan kartaa bogga 4-aad.

## Bilic-soo-celinta Flemington iyadoo la adeegsanayo rinji iyo jardiinooyin

Shaqadu waxay ka bilaaban doontaa dhismaha Holland Court.

## Kulamada macluumaadka lagula wadaagayo dadka deegaanka ayaa sii soconaya

Kulamadii dhawaan la qabtay ayay si wanaagsan ay u soo dhaweeyeen dadka deegaanka. Waan sii wadi doonnaa, faahfaahintana ka eeg boodhadhka ku dhagan goobta laga soo galo.

Homes Victoria waxay qiraysaa in dadka Aboriginal-ka iyo Torres Strait Islander-ay yihiin Mas'uuliyiintii dhaqanka ee dhulka waxayna u mahadcelinayaan isla markaasna ixtiraam u muujinayaan Odayashoodii, hore iyo kuwa hadda noolba.



# U dabaaldeg furitaanka Barxada Murnalung

**Qof walba waxa uu daneynayo ayuu ka heli doonaa barxada cusub ee Murnalung, taas oo ku taal bartamaha xaafada Flemington.**

Magaca loo bixiyay barxada waa 'Murnalung' waxaana magacaas u bixiyay odayaasha dhaqanka ee bulshada Wurundjeri Woi Wurrung, micnaha magacaasina waa 'shinni'. Meeshuna waxay noqon doontaa hoyga shinnida oo waxyaabo badan lagu qaban doono.

Waxay leedahay meelo lagu ciyaaro (playgrounds) iyo meelo dabiici ah oo ay caruurta ku ciyaari karaan iyo sidoo kale meelo caws leh oo loogu talagalay in lagu nasto ama lagu cunteeyo. Waxaa kaloo jira qalab jimicsi lagu sameyn karo oo dibeda yaala, dariiqyo loogu talagalay baaskiilada iyo dadka lugeynaya, iyo kuraas la fariisto.

Munaasabada Winter Park Warming ayaa ah qaab aan ugu mahadcelinayno bulshada deegaanka annagoo idinkaga mahadcelinayna dulqaadkiina iyo fahamkiina intii aan dib-u-habaynta ka wadnay xaafada Flemington.

Isha ku hay macluumaadka ku saabsan munaasabaddaas taas oo aan ku soo bandhigi doonno boodhadhka ku yaalla agagaarka iyo boggeena internetka toddobaadyada soo socda.

**Kaalay oo nagala soo qaybgal munaasabadda Winter Park Warming ee la qaban doono iskuulka marka laga yimaado ka dib**

**Khamiista, 6-da bisha Ogosto 3:30 galabnimo ilaa 5:30 galabnimo**



- Cunto iyo cabitaanno kulul
- Ciyaaraha iyo madadaalada carruurta

## Nagu xirnoow


Kulamada la isku xog wareysanayo

Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga

Isdiiwaangeli si aad ula socoto wixii soo kordha

Si aad wax kasta ula socoto booqo:

homes.vic.gov.au/flemington-precinct



nagala soco baraha bulshada raadi **Homes Victoria**


Waxaa ansixisay oo daabacday Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne. © Gobolka Victoria, Homes Victoria, bisha Luulyo 2026. (HV020726). Waxaa daabacay Finsbury Green, Melbourne Victoria, 3000.

More Homes For Victorians

VICTORIA State Government

# Maxaa ka socda Flemington

## Bilaha Luulyo/Ogosto 2026




## Inaysan wax dhibaato ah kaa soo gaarin meelaha ay shaqadu ka socoto ee xaafadaada

Waxaan si joogto ah ula soconaa waxyaabaha ay ka mid yihiin shanqarta, boodhka iyo gaariirka si wax kasta amaan u ahaadaan.

**Ku wareega agagaaraha**

- Marwalba inta aanan shaqada la bilaabin ka hor waxaa meesha lagu wareejin doonaa deyr
- Waan kuu sheegi doonaa goorta iyo goobaha aad ka filan karto baabuurta waaweyn ee xamuulka
- Marwalba raac calaamadaha si aad wadooyinka goobta ugu dhex socoto
- Raac tilmaamaha shaqaalaha baabuurta haga markay halkaas ku sugan yihiin si ay kuu caawiyaan

**Si nabdoon in loo maareeyo alaabaha**

- Nidaam amni oo adag ayaa marwalba jiri doona marka meesha laga saarayo lana nadiifinayo waxyaabaha khatarta keeni kara
- Calaamado wax sharaxaya ayaa marwalba goobta la dhigi doona si aad uga fogaato meelaha ay yaalaan waxyaabaha khatarta leh.
- Waxaa laga yaabaa inaad aragto shaqaalo xiran dhar jirka difaacaya

**In la helo meelo laga geli karo**

- Meelo ay ka geli karaan adeegyada gurmadka degdega ah ayaa marwalba jiri doona
- Meelo laga geli karo baarkinada baabuurta la dhigto, oo ay ku jiraan baarkinka naafada, ayaa la heli doonaa
- Wadooyinka ku meelgaarka ah waxaa loo sameyn doonaa nalal iftiimiya

Shaqada aan qabano waxaa hagta saacadaha caadiyan la shaqeeyo ee u degan Golahaaga:

| Isniin ilaa Jimce | Maalmaha sabtida |
|---|---|
| inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo | 9-ka subaxnimo ilaa 3-da galabnimo |

Mararka qaarkood waxaa loo baahan yahay ogolaanshaha golaha deegaanka (council permit) si loo shaqeeyo wixii ka baxsan saacadahaas balse waan lasoo socodsiin doonaa dadka deegaanka haddii ay taasi dhacdo.

Wixii shaqo ah oo dhan waxaa loo qabtaa si waafaqsan heerarka ugu sarreeya ee amniga iyo shuruudaha sharciga.

**Kala soco meelaha darbiyada ogeysiisyada lagu soo dhajiyo wixii kusoo kordha shaqada**

Dadka deegaanka ee u baahan macluumaad dheeraad ah hala xiriiraan xafiiska guryaha ee deegaanka:

1300 360 462

**ascotvale.housing@dffh.vic.gov.au**

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: **homes.vic.gov.au/information-in-your-language**

Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

**enquiries@homes.vic.gov.au**